



Qof kasta iminka wuu is talaali karaa

Muxuu muhiim u yahay talaalka COVID-19?

Talaalku waxa uu ka **ilaaliyaa** dadka COVID-19.

Hadii dad badan la talaalo:

- Dad yar ayaa xanuunsanaya.
- **Dad yar ayaa dhimanaya.**

Ma khasabaa in aan is talaalaayi?

Maya, kuguma aha khasab.

Adiga ayay kugu xidhan tahay inaad is talaasho iyo in kale.

Ma lacaga ayaan bixinayaa?

Maya, talaalku waa u **bilaash** qof kasta.

Miyaa talaalku yahay amaan iyo mid waxtar leh?

Haa, talaalku waa amaan. Daraasadaha ayaa muujinaya inuu waxtar leeyahay.

Khabiirada caafimaadka waxa ay u ansixiyeen talaalka Switzerland. Waxa ay daraasadeeyeen talaalka iyo waxtarkiisa. Kumanaan ruux ayaa ka qayb qaatay daraasada. Toban milyan oo ruux ayaa ilaa iminka qaatay talaalka caalamka oo dhan.

Miyuu talaalku keenaa saamayn caafimaad daro kale?

Waxa uu keenaa saamayn caafimaad daro kale, **sida talaal kasta oo kale.**

Badankood, dadku waxa ay dareemaan **daal ama madax xanuun ama xumad.** Waxa ku damqan karta meesha lagaa muday. Wax weeye jawaab celin iska caadi ah oo uu keeno talaalku. Way yar tahay oo mudo dheer ma qaadato.

Aad ayay u yar tahay, inay dadku yeeshaan jawaab celin aad u culus. Waxa uu keeni karaa jawaab celin xasaasiyeed, tusaale ahaan. Laakiin waxa ay taasi dhacdaa isla marka sidaa aad isku talaasho. Oo weli waxa aad la joogtaa xirfadlaha caafimaadka wakhtigaas.

Waxa aan hore u qaaday COVID-19. Ma khasabaa in aan is talaalaayi?

Haa, waa inaad is talaashaa hadii aad xanuunsatay **wax ka badan lix bilood kahor.**

Yay tahay inayna is talaalin?

Waa in aanad is talaalin hadii **aad xasaasiyad ka qaado wax ka mid ah waxyaabaha uu ka samaysan yahay talaalku.** Waxa lagu waydiin doonaa su'aalo badan kahor inta aan lagu talaalin.

Halkee ayaan ka helayaa

talaalka?

Waxa aad ka heleysaa talaalka **farmasiiga** ama **dhakhtarka qaliinka**.

Waxa aad sidoo kale ka heli kartaa **xarunta talaalka** dadka badan, tusaale ahaan isbitaalka ama Beaulieu (Lausanne).

Waxa sidoo kale jiri doona koox soo booqan doonta **aagaaga**. Waxa aad ka eegtaa waraaqaha xaafadaada ama ka hel macluumaad shaqaale aad garanayso.

Sidee ayaan balan u samaysan karaa?

Waxa aad la hadli kartaa lambarkan:

058 715 11 00

Qof ku hadlaya luuqadaada ayaa ku duwaan gelin kara.

Waxa aad sidoo kale iska duwaan gelin kartaa **websaytkan**: www.coronavax.ch

Goobta talaalka maxaa ka dhaca?

Marka kowaad, waxa lagu waydiin doonaa su'aalo si loo ogaado hadii aad leedahay xasaasiyad ama uur.

Kadibna waxaa lagaag **mudi** doonaa talaalka muruqaaga sare ee gacanta.

Waxa aad **sugi doontaa 15 daqiiqo** kahor inta aanad ka tegin.

Waxa aad u baahan tahay talaal labaad bil kadib, adiga oo hore u qaaday moojee COVID. Waxa aad qabsan kartaa balanta talaalka labaad adiga oo jooga halkaas.

MUHIIM: Waa in aanad u iman talaalka hadii aad qabto xumad ama aad xanuunsanayso. Marka hore waa inaad iska baadhaa COVID-19.

Ma in aan xidhaa waji gashad kadib marka aan qaato talaalka?

Haa. Wakhti xaadirkan, **qof kastaa** waa inuu sii wadaa raacitaanka shuruucda.

Aad ayay muhiim u tahay in la xidho waji gashad iyo dadka kale laga fogaado.

Waa qaabka ugu wanaagsan ee aad u ilaalin karto dadka aan talaalnayn.

Ma u socdaali karaa dalka dibadiisa kadib marka aan is talaalo?

Haa, laakiin waa inaad marka hore eegtaa shuruucda dalka aad doonayso inaad booqato.

Waxa aan weli qabaa su'aalo ku saabsan talaalka...

Waxaad la hadli kartaa lambarkan: **058 715 11 00**

Waxa aad kaga heleysaa macluumaadka 9 luuqadood oo kala duwan **www.vd.ch/corona-multilingue**.

Waxaad sidoo akle **sawiri kartaa QR code-kan**.

